SHARCIGA DEMBIYADA EE KANADA TAGISTA MAXKAMADDA SAMEE QORSHE



- Diyaari turjumaan - Waxaad ka codsan kartaa turjumaan bilaash ah qareenkaaga ama shaqaalaha maxkamadda. Samee codsigan sida ugu dhakhsaha badan.

- Qorshee sida aad halkaas u tagi doonto - Ogeysiiska imaanshaha ama yeedhmada maxkamadda ayaa sheegi doona taariikhda, wakhtiga, iyo goobta taariikhda maxkamaddaada. Waa inaad halkaas joogtaa waqtiga loogu talagalay. Haddii aadan maxkamadda aadi karin shaqo, jirro, ama mas'uuliyad qoys awgeed, u sheeg maxkamadda sida ugu dhakhsaha badan. Codso in taariikhda maxkamadda dib loo dhigo.

- Soo kaxee qof ku taageera - Waxaad maxkamadda keeni kartaa qof ku taageera si aad u hesho taageero shucuureed, kaa caawiyo habeynta dukumiintiyada, ama qoraallo kuu qaado. Qofkaas ma kuu hadli karo. Marka magacaaga la idhaahdo, u sheeg garsooraha inuu kuu joogo qof ku taageera, magaciisa, iyo sida uu kuu yahay qaraabo. Tusaale ahaan: "Waxaan haystaa qof i taageera, [Magaca], oo ah saaxiib qoyska ka mid ah."

- Soo qaado waraaqaha - Soo qaado wixii foomam ah ama dukumiintiyo kale ah ee aad heshay ee la xiriira eedeymaha lagugu soo oogay.

- Ku celceli waxa aad odhan doonto - Istaag marka aad la hadlayso garsooraha ama marka garsooruhu kula hadlayo. Si cad oo cod dheer u hadal si uu garsooruhu kuu maqlo. Maxkamadda Gobolka, markaad la hadlayso garsooraha, waxaad garsooraha ugu yeedhaa "Your Honour" (Sharaftaada).

- La hadal qareenka waajibaadka - Qareenka waajibaadka waa qareen u shaqeeya Nova Scotia Legal Aid oo bixiya talo sharci oo aasaasi ah oo bilaash ah marka maxkamadda la joogo. Waxaad weydiisan kartaa shaqaalaha maxkamadda meesha aad ka heli karto.

- Qor oo weydii su'aalo - Haddii aadan fahmin wax uu garsooruhu, Qareenka Boqortooyadu, ama shaqaalaha maxkamaddu yiraahdaan, waxaad weydiisan kartaa inay kuu soo celiyaan ama ay si kale u yiraahdaan. Qor qoraallo ku saabsan taariikhaha maxkamadda ee cusub ama macluumaadka ay tahay inaad maxkamadda siiso.

QORAALLO

Bulshada Macluumaadka Sharciga ee Nova Scotia waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan sharciga. Waxaad su'aalo ku weydiin kartaa iimayl, sheekeysi toos ah, qoraal, ama taleefan. Waxay kaa caawin karaan inaad fahamto fursadahaaga iyo waxa sharcigu sheegayo. Ma siin karaan talo sharci ama ma kula tegi karaan maxkamad.